

2024

Dheefaha Magaalada Seattle ee aad ku Heli Karto Si Fudud

(Shaqaalaha leh *Dheefaha Caymiska ee Ugu Badan)

U qalmitaanka: Shaqaalaha cusub iyo dadka ku tiirsan, caymisku wuxuu bilaabmayaa maalinta ugu horeysa ee shaqadaada haddii taariikhdaas ay tahay maalinta taariikhda ugu horeysa ee bisha loo qoondeeyay inay noqoto maalin shaqo ee magaalada. Ama caymisku wuxuu bilaabanayaa maalinta koobaad ee bisha loo ama loo aqoonsaday maalinta ugu horeysa ee shaqada ee shaqada lagaa shaqaalaysiiyay. Haddii shaqadaadu bilaabanto taariikhdan kadib, caymiskaagu wuxuu bilaabmayaa maalinta kobaad ee bisha soo socota.

Dadka ku Tiirsan ee U Qalma: Dadka u qalma caymiska waxaa kamid ah xaaskaaga ama lamaanahaaga qoyska, ilmaha aad dhashay ama carruurta aad korsatay ama carruurta lagu xilsaaray korintooda, carruurta lamaanahaaga qoyska, carruurta uu adeerka u yahay, iyo ilmo kasta oo aad u tahay mas'uulka sharciga ah ama kan Amarka Taageerada Ilmaha ee Aqoonta leh uu u baahan yahay caymis. Carruurta waaweyn waxay u qalmaan caymis haddii ay ka yar yihiin 26. Haddii aad ku darto dadka kugu tiirsan, waxaa lagu weydiin doonaa dukumeenti cadeynaya u-qalmitaanka caymiskooda iyada oo loo marayo qorshayaasha Magaalada Seattle.

Iska Diwaangalinta: Waa in aad iska diwaangaliso 30 maalmood gudahooda ee shaqaalaysiinta. Haddii aad ku guul dareysato inaad iska diwaangeliso 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhdaada shaqaalaynta, Magaaladu waxay si toos ah kagu diwaangelin doontaa caymiska caafimaadka ilkaha iyo araga ee aasaasiga ah. Daboolistaada ilkuhu wuxuu noqon doona qorshaha Delta Dental of Washington. Haddii aad dhawaan u qalanto caymiska caafimaadka oo aadan si firfircoon u dooran ama aadan ka tanaasulin caymiska caafimaadka, waxa si toos ah lagaaga diwaangalin doonaa qorshaha shaqaale kaliya ee Aetna Traditional, kaas oo aan kaa doonaynin wax lacag ah.

Daryeelka Ilkaha: Waxaad dooran kartaa Delta Dental of Washington ama Dental Health Services. Qorshayaasha ilkaha waxa kamid ah caymiska dadka ku tiirsan ee u qalma. Lacagta caymiska waxaa si buuxda u daboolaya Magaalada Seattle.

Qorshaha Kaiser Permanente ee Lacagtiisa la Jaro	\$25.00	\$56.92
--	---------	---------

** La jirka ama la'aanta caruur

Araga: Waxaad dooran kartaa qorshaha daryeelka araga aasaasiga ah ama Midka Iibsashada VSP (Vision Service Plan). Baaritaanka indhaha ee sanadlaha ah ayaa la daboolaa sanad walba labada qorsheba. Magaaladu waxay si buuxda u bixisaa lacagta caymiska ee qorshaha aasaasiga ah. Waxaad ku bixinaysaa \$10.38 qorshaha libka, kaas oo kobcinaya xulashooyinka ukuyaalaha indhaha.

Caafimaad: Waxaad ka dooran kartaa Qorshaha Heerka Caadiga ah ee Kaiser Permanente, Qorshaha Ka Hoortag ahaaneed Aetna, ama Qorshaha Daryeelka Soo Jireenka ah ee Aetna. Kharashka bilaha ah ee mid kasta oo kamid ah qorshayaasha waa sida soo socota:

Qorshaha Caafimaad	Kharashka Caymis ee ay Bixinayaan Shaqaalaha Bil kasta	
	Shaqaaale**	Shaqaalaha iyo xaaska ama lamaanaha qoyska**
Aetna Preventive	\$48.12	\$98.50
Aetna Traditional	\$ 0.00	\$32.34
Kaiser Permanente Standard	\$48.40	\$99.90

Adeegyada u Dooditaanka: Shaqaalaha iyo xubnaha qoyska la caymiyay waxay heli karaan adeegyada u doodista ee Accolade. Kaaliyaasha Accolade Health waxay bixiyaan taageero qof-qof ah oo kharash la'aan ah. Kaaliyaasha Caafimaadku waa goob kheyraad ah oo lagaga jawaabo su'aalaha caafimaadka iyo dheefaha, waxayna la shaqeeyaan koox dhakhaatiir ah, kalkaaliyeyaal caafimaad, iyo takhasuslaha dheefaha si ay uga caawiyaan socodsiinta nidaamka daryeelka caafimaadka.

Koontada Kharash Garaynta Dabacsan (Flexible Spending Accounts, FSA): Magaaladu waxay bixisaa Daryeel Caafimaad iyo Daryeel maalmeedka FSA iyada oo loo marayo Navia Benefits Solution. Koontada FSA ee Daryeelka Caafimaadka waxay kuu ogolaanayaa inaad isticmaasho lacagta cashuurta kahor si aad u hesho kharashka caafimaadka, ilkaha, iyo kharashka araga uu u qalmo. Koontada FSA ee Daryeel maalmeedka waxay kuu ogolaanaysaa inaad hesho kharashka u qalma kharashaadka xannaano maalmeedka ee ubadkaaga kugu tiirsan ilaa da'da 13,

*Waxaa ku jira CMEO-yada, Taliyeyaasha Dab-damiska, Shaqaalaha Guud ee Magaalada, Shaqaalaha Maktabadda, xubnaha Seattle Police Management Association (SPMA). Taliyayaasha Dab-demiska iyo CMEOs - kala xidhiidh waaxda maamulka shaqaalaha wax aad ku bixinaysa lacagta caymiska.

xaaska naafada ah / lamaanaha guriga, ama waalidka kugu tiirsan. Waxaad dooran kartaa ugu yaraan \$120 ilaa \$3,050 sanadka 2024 daryeelka caafimaadka FSA iyo \$5,000 ee qorshaha Daryeelka Maalintii. Haddii aad doorato inaad ka qaybgasho qorshahan oo aad rabto inaad sii wadato ka qaybqaadashadaada, waxaad u baahan doontaa inaad dib isugu diiwaangeliso sanad kasta inta lagu jiro xilliga diiwaangelinta furan ee Magaalada.

Waxa laga yaabaa in aad qaadato ilaa \$610 lacagaha FSA ee Caafimaadka ee aan la isticmaalin laga bilaabo qorshaha sanadka 2024 ilaa sanadka qorshaha 2025 ilaa inta ay natiijada xawilaadu ka dhalanayso cabirka koontada ugu yar ee \$120.

Caymiska Aasaasiga ah ee Naafonimada Mudada

Dheer: Haddii aad naafo noqoto kadib 90 maalmood oo sugitaan ah, qorshuhu wuxuu ku siin doonaa faa'iido aasaasi ah oo ah \$400 bishii markaad awoodin inaad shaqeyso. Lacagta aasaasiga ah ee naafanimada mudada dheer waxaa si buuxda u bixisa Magaalada. Waxaad iibsana kartaa dheefaha dadka naafada ee mudada dheer ee kaabista ah (hoos ka eeg).

Caymiska Kaabista ah ee Naafonimada Mudada

Dheer: libso caymiska naafanimada mudada dheer ee dheeriga ah si aad u bixiso ilaa 60% mushaharkaaga aasaasiga ah ee ka badan \$667 ilaa ugu badnaan \$8,333 bishii.

Caymiska Aasaasiga ah ee Nolosha Mudada ee

Aasaasiga ah: Waxaad ka dooran kartaa mid kamid ah labada qorshe - Caymiska Aasaasiga ah ee Nolosha Mudada ee Aasaasiga ah, oo ah hal iyo bar dakhligaaga sanadlaha ah, ama Kooxda Aasaasiga ah ee Muddada Nolosha Caymiska ee \$50,000. Magaaladu waxay ku biirin doontaa 40% ee kharashka Caymiska Nolosha Muddada ee Aasaasiga ah.

Caymiska Kaabista ah ee Mudo Nolosha kamid ah:

Haddii aad dooratay Muddada Kooxda Aasaasiga ah, waxaad iibsana kartaa caymis nololeed oo dheeri ah oo loogu talagalay naftaada, xaaskaaga/ lamaanahaaga qoyska, iyo caruurtaada. Caymiska nolosha ugu badan ee aad heli karto waa afar labanlaab dakhligaaga sanadlaha ah. Xaaskaaga/ Lamaanahaaga qoyska waa 100% qadarka caymiska aad adigu doorato ilaa ugu badnaan \$500,00. Waxaad u iibsana kartaa \$2,000, \$5,000 ama \$10,000 caymiska caruurtaada.

Ku Dhimasho shil ah iyo goynta Adimaha

Caymiska (Accidental Death & Dismemberment Insurance, AD&D): Waxaad iibsana kartaa caymiska AD&D oo loogu talagalay adiga kaligaa ama adiga iyo qoyskaaga. Caymiska la heli karo wuxuu ka bilaabanayaa \$25,000 ilaa \$500,000.

Dheefaha Hawlgabka

Nidaamka Hawlgabka Shaqaalaha Magaalada Seattle (Seattle City Employees' Retirement System, SCERS I iyo II): Waxaa jira laba qorshe hawlgab oo loogu

talagalay shaqaalaha Magaalada oo ku kala duwan qadarka ay bixiyaan, da'da ugu yar ee hawlgabka, celceliska mushaharka ugu dambeeya, iyo dheefaha laga helo sanadkii ee isku-dhufashada adeegga.

SCERS I (la shaqaaleysiiyay oo iska diiwaangeliyay kahor Janaayo 1, 2017): Waxaad ku biirinaysaa 10.03%, Magaaladu waxay sidoo kale bixinaysaa 15.29% mushaharkaaga hawlgabnimadaada.

SCERS II (la shaqaaleysiiyay Janaayo 1, 2017, ama kadib): Waxaad bixinaysaa 7.0%, Magaaladu waxay sidoo kale ku siinaysaa 14.42% mushaharkaaga hawlgabkaaga.

Kharashka La Bixinayo iyo dakhliga cashuurta dib loo dhigo. Waxaad 100% iska leedahay wax ku biirintaada iyo dakhligooda. Waxa aad noqonaysaa qof maalgashanaya (u-qalanto dheefaha bilaha ah da'da hawlgabka) shan sano oo adeeg ah. Haddii aad ka tagto shaqada magaalada kahor hawlgabnimada oo aad la noqoto lacagta aad ku darsan karto, xaq uma yeelan doontid mid ka mid ah lacagta aad ku biirin jirtay Magaalada.

Haddii aad u soo shaqeysay goboleedka ama dawladaha hoose ee kale, waxa laga yaabaa inaad u qalanto inaad wakhtigaaga adeeg isugu geysa si aad ugu qalanto hawlgabnimada.

Waxaad wax badan u kaydsan kartaa lacag badan hawlgabkaaga adiga oo isticmaalaya Qorshaha Magdhawga Ikhtiyaariga ah ee Dib loo Dhigay ee Magaalada (hoos ka eeg).

Qorshaha Magdhawga Dib loo Dhigay ee Ikhtiyaariga

ah: Diiwaangelinta Qorshaha Magdhawga Dib loo dhigay ee 457 ee Magaalada waa ikhtiyaari. You are allowed to contribute through payroll deductions. Adiga ayaa go'aaminaya qadarka lacagta, nooca lacag bixinta, iyo fursadaha maalgashiga. Waxa laga yaabaa inaad ku darsato ugu yaraan \$10 jeegii mushaharkiiba. Isbedelka diiwaangelinta iyo wax ku biirinta ayaa la samayn karaa wakhti kasta. Magaaladu ma bixinayso lacag lamid ah qadardka aad bixinayso.

Barnaamijyada iyo Dheefaha Shaqada/Nolosha

Reach: Waxa laga yaabaa inaad ka qaybqaadato Reach, oo ah tabaruc khadka tooska ah iyo barnaamijka abka fayyo-qabka ku salaysan ee shaqaalaha iyo xaasaska/lamaanaha qoyska ee la daboolay. Reach waxay ku siinaysaa hawlo soo jiidasho leh, agab waxtar leh, iyo nuxur waxbarasho si ay kaaga caawiyaan inaad gaadho yoolalkaaga dhaqaale, shucuur, bulsho, iyo shaqo oo aad ku raaxaysato safarkaaga.

Barnaamijka Kaalmada Shaqaalaha (Employee Assistance Program, EAP): Kheyraadka Nolosha EAP waxay adiga iyo xubnaha qoyskaaga siisaa adeeg soo gudbinta iyo talo bixin. Hel caawinaad qarsoodi ah oo ku saabsan arrimaha gaarka ah sida walbahaarka, niyad-jabka, iyo dhibaatooyinka qoyska iyo xiriirka. Xubin kasta

oo qoyska ka mid ah waxa uu xaq u leeyahay lix kulan oo saacad ah oo lacag la'aan ah sanadkiiba.

Gaadiid: Waxaad heli kartaa Kaarka Baasaboorka ORCA (One Regional Card for All), kaas oo si buuxda u bixiya dhamaan gaadiidka dhulka ku salaysan, oo ay ku jiraan tagsiga biyaha mara iyo Kitsap Fast Ferry. Waxaan sidoo kale bixinaa Vanpool iyo dheefaha rakaabka kaliya ee WA State Ferry. Haddii aad isticmaashid mid ka mid ah ikhtiyaarka safarka ee aan darawalka ahayn, waxa kale oo aad xaq u leedahay Guri Raacid la dammaanad qaaday – raacitaanka tagsiga ee guriga lagu bixiyo haddii ay dhacdo qoys ama xaalad degdeg ah oo caafimaad.

Career Quest: Career Quest waxay bixisaa fursado horumarineed oo xirfadeed oo habaysan si loo balaariyo xirfadahaaga ama looga caawiyo yoolalkaaga shaqo ee mudada-dheer. Si aad ugu qalanto, waa inaad tahay shaqaale joogto ah ee Magaalada, oo u shaqeeyay ugu yaraan hal sano, oo aad u heelan tahay horumarinta xirfado iyo aqoon cusub.

Maalmaha Fasaxa: Magaaladu waxay leedahay 12 fasax oo rasmi ah iyo 2 fasax oo gaar ah. Waxaad qaadan kartaa fasaxyadaada gaarka ah wakhti kasta iyadoo la raacayo ogolaanshaha kormeerka.

Fasaxa Dalxiis: Waxaa kuu ururay fasax dalxiiska ku salaysan saacadaha heerka mushaharka caadiga ah. Qadarka fasaxa dalxiis ee la helay waxay ku xiran tahay muddada adeeggaaga—laga bilaabo 12 maalmood sannadkii shaqaale cusub ilaa 30 maalmood sanadkii ka dib 29 sano oo shaqo ah. Saacadaha fasaxa ee aan la isticmaalin waxaa loo qaadan kataa sanad kasta, ilaa ugu badnaan, taas oo ku xiran sanadaha adeegga.

Fasaxa Jiro: Waxaad kuu ururaya fasax jiro ahaaneed iyadoo lagu saleynayo tirada saacadaha caadiga ah ee la shaqeeyay. Shaqaalaha maalinta buuxa waxay helayaan 96 saacadood oo fasax jiro ah sannadkii. Waxaad u qaadan kartaa sanadka kale fasaxaaga jirada ee aan la isticmaalin; ma laha ururinta ugu badan.

Fasaxyada Kale: Magaaladu waxaa kale oo ay bixisaa fasax lacag ah iyo mid aan mushahar lahayn: fasax waalid oo mushahar ah, fasaxa aaska, fasaxa qoyska iyo caafimaadka, naafanimada uurka, waajibaadka xeerbeegtida, fasaxa waajibaadka milatariga, qofka ku deeqaha unug qof kale, fasax shakhsi oo aan mushahar lahayn, iyo fasaxa sabbatical.

Shaqaaluhu sidoo kale waxay leeyihiin ikhtiyaarka ah inay codsadaan Barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka Lacag-bixinta ee Washington marka lagu daro Fasaxa sare ee magaalada.

